## Waxaan rabnaa inaan Iswiidhan hagaajinno – Maxa yeelay Iswiidhan sidaan way ka wanaagsanaan kartaa. Aad bay uga wanaagsanaan kartaa.

Waxaa jirta Iswiidhan taas oo ereyada ah xaafadaha dibed-joogga ah taariikhda lagu qoray, maxaa yeelay ma jirto meel gooni loo saarayo mar dambe. Iswiidhan oo xor ka ah rabshadaha burcada iyo xukunka qabiiliga, halkaas oo sharciga iyo sinnaantu ay khuseeyaan qof kasta.

Halkaas oo boolisku yimaado marka loo yeero oo uusan dib u guranayn marka loo baahan yahay. Halkaas oo dhibbanayaasha dambiga , maaha kuwa dambiilayaasha, inay helaan dib u sixid iyo magdhow. Halkaas oo aad ammaan dareemayso marka aad bannaanka marayso maadaama dembiileyaashii ay xabsiyada ku jiraan.

Waxaa jirta Iswiidhan ay tahay in carruurta oo dhani ay arkaan waalidiintooda oo shaqada u dareeraya. Halkaas oo had iyo jeer lagugu abaalmariyo inaad shaqeyso oo sida ugu fiicana aa u qabato. Halkaas oo shaqada adag iyo hawlkarnimadu ay ka badinayso musuqa iyo cudurdaarrada xun xun, iyada oo ay shabakadda badbaadadu u taagan tahay daryeelka kuwa u baahan.

Waa Iswiidhan uu dugsigu yahay goob kalsooni oo u taagan aqoon iyo horumar bulsho. Halkaas oo ay tahay in carruurtu ay Iswiidhish fiican bartaan goor hore. Halkaasi oo ay tahay in waalidka iyo carruurtu ay iyagu doortaan, ee aan hal ardayna si Khasab ah bas loogu saarin dugsi loo qoondeeyay.

Waa Iswiidhanta uusan qofna walbahaar ka qaadeyn marka uu furo warqadda biilka korontada. Halkaas oo marka aad u baahato inaad carruurtaada geyso tabobarka kubbadda ama dugsiga muusigga aad awooddo inaad gaariga qaadato, baasiin ama koronto midkuu doono ha ku shaqeeyee.

Waa Iswiidhanta ay quwadda nukleerka ee cimilada u roon ay dhalinayso koronto nadiif ah, deggen oo qiimeheedu jaban yahay, iyadoo warshaddii korontada ee saliidda ku shaqaynaysay ee u dambeysay la xiray. Halkaas oo kuwa deegaanka ku xadgudba ay qiimo sare ugu kacdo, balse aad bac balaastiig ah alaabtaada ku soo qaadan karto marka aad toddobaad kasta dukaanka ka soo adeeganayso.

Iswiidhantaasi waxay noo jirtaa meel ay gacantu gaarto - waa uun kaliya haddii aan hayno rabitaan iyo awood lagu qabto waxyaabaha loo baahan yahay.
Xisbiga Moderaterna wuxuu hayaa rabitaankii iyo awooddii labadaba.

Hadda ayaan Iswiidhan hagaajinaynaa.





**Sida aan u hagaajin doono badbaadada iyo amniga:**

- Kordhin tirada booliska, kordhin mushaarka booliska iyo in lacag la siiyo inta ay tabobarka waxbarasho ku jiraan
- Awoodda booliska oo la siyaadiyo, sida in la sameeyo aagag baaritaan si loo qabto hub badan
- markhaatiyo qarsoon, si ay dadku ugu dhiirradaan inay ku marag-furaan dambiilayaasha
- masaafurinta dadka ajaanibka ah ee dambiyada waaweyn ku gala Iswiidhan
- ciqaabaha oo la adkeeyo, joojinta ciqaab dhimista marka dambiyo badan qof galo iyo joojinta ciqaab dhimista loo sameeyo dambiilayaasha 18 sano ka weyn

**Sida aanu hagaajin doono shaqada:**

- canshuur-dhimis xagga shaqada ah, gaar ahaan dakhliyada hoose iyo kuwa dhexdhexaadka ah
- saqaf loo sameeyo kaalmooyinka lacageed, si mar walba ay shaqadu uga faa'iido badnaato kaalmada
- shuruud ah inuu qofka kaalmo lacageed qaadanaya uu hawl qabto
- canshuur-dhimis xagga gunnada hawlgabka – qofkii soo shaqeeyay waa inuu faa'iidadeeda dareemaa
- tirakoob qaran oo dadweyne si loola dagaallamo dambiyada iyo ka-takoornaanta bulshada

**Sida aanu hagaajin doono dhaqaalaha:**

- maya cashuurta guryaha iyo dhulalka iyo kharashyada kale oo la dulsaaro dadweynaha
- yaraynta canshuurta baasiinka iyo naaftada
- dhimista canshuurta kaydka lacageed (koontada kaydka maalgashiga, ISK)
- wanaajinta fursadaha shrikadaha iyo ka yaraynta sharciyada dhibaya
- hagaajinta iyo nidaaminta dhaqaalaha dawladda



**Sida aan aan u hagaajin doono cimilada iyo saadka korontada:**

- maalgelinta tamarta nukliyeerka cusub - haa wixii aan shidaal qadiim ah ahayn, maya gaaska iyo saliidda Ruushka
- gaadiid nadiif ah oo koronto ku socda iyo kaabayaasha dabka siiya
- xoojinta fursadaha warshadaha si ay ugu guuraan koronto nadiif ah waxna u dhoofiyaan iyagoo yaraynaya saamaynta cimilada
- kordhinta deeqda cimilada
- wadashaqayn caalami ah, gaar ahaan gudaha midowga Yurub

**Sida aan aan u hagaajin doono is-dhexgalka bulshada:**

- adkaynta soo gelidda qaxootiga, iyo masaafurinta kuwa aan sharci u haysan inay Iswiidhan joogaan
- xoog-saaridda shaqo helidda iyo adkaynta shardiga barashada Af-iswiidhishka
- baaris luqadeed oo rugta caafimaadka dhallaanku ay samayso iyo dugsi xannaano luqadeed oo waajib ah
- mamnuucidda guurka ilmo-adeerrada, ilmo-abtiga iyo habro-wadaagga, iyo adkaynta ciqaabta gacan-ka-hadalka iyo cadaadisk sharafta la xiriira
- mamnuucidda maxkamadaha qabaa'ilka iyo samaynta waax boolis oo arrimaha qabiilka qaabilsan

**Sida aan aan u hagaajin doono dugsiyada:**

- diirad-saaridda aqoonta la cabbiri karo iyo kordhinta xiisadaha waxbarasho
- awoodo cadcad oo macallimiinta iyo maamuleyaasha la siiyo si ay deggenaansho iyo kala-dambeyn u abuuraan
- ilaalinta xorriyadda dugsi-doorashada, balse la dagaallamidda milkiilayaasha dugsiyada ee aan daacadda ahayn iyo khiyaanada
- xarun dhexe oo saxda imtixaanka qaranka si looga hortago sicirbararka shahaadooyinka
- joojinta qoondeynta iyo bas-u-saaridda ardayda dugsiyo ay tayadoodu xun tahay